

## **OGEYSIIS MUHIIM AH OO KU SAABSAN DHEXDHEXAADINTA**

Sida lagu sheegay Ogeysiiska Jadwal-galinta ee la socda, waxa jadwalka kuugu jira ama kuu ballansan inad u timaadid dhexdhexaadin taariikhda la muujiyay. Dhinac kasta waxa laga filaa inu yimaado ama la socdo qareen ama aanuu la socon iyo inu sameeyo dedaal niyadsan in la dhexdhexaadiyo dhammaan arrimaha muran ka jiro. Kahor taariikhdaas, dhinac kasta waxa lagu dhiirigalinayaa inu qareen ama looyar kala hadlo macluumaadka looga baahan yahay dhexdhexaadinta iyo xuquuqda sharci ee dhinac kasta. Waxa halkan la socda koobi ah “Dhexdhexaadinta Arrimaha Qoyska.” Haddii ad tallaabadan ka tahay la-taliye sharci, fadlan Ogeysiiskan iyo qoraalka yar boostada ugu dir macmiilkaaga si looga caawiyo inu isku diyaariyo dhexdhexaadinta oo loo balaadhiyo guusheeda.

**\*\*MUHIIM\*\***

**HADDII MAXKAMADDU OGAATO IN DHINAC U KU FASHILMAY INU SAMEEYO DEDAAL NIYADSAN OO KU SAABSAN DHEXDHEXAADINTA, WAXAY MAXKAMADDU KU AMRI KARTAA DHINACYADA INAY U HOGAANSAMAAN DHEXDHEXAADINTA, AMA WAXAY LAALI KARTAA TALLAABADA AMA QAYB KA TIRSAN TALLAABADA, AMA SOO SAARI KARTAA UJRO IYO KHARASH QAREEN AMA WAXAY SAARI KARTAA CIQAAB KALE OO KASTA OO KU HABOON XAALADAHA.**

**WAXA KALE OO LAGA YAABAA IN MAXKAMADDU CIQAABO SAARTO QOFKA KU FASHILMAY SABAB FIICAN LA'AANTEED INU YIMAADO DHEXDHEXAADINTA KADIB MARKII U HELAY OGEYSIISKA WAKHTIGA AY BALLANSANAYD DHEXDHEXAADINTU, AMA HADDII U KA BAAQDAY INU BIXIYO KHARASHKA DHEXDHEXAADINTA AMA U WAKHTI HABOON KU SOO HELO KA DHAAFID KHARASH.**

### Kharashka dhexdhexaadinta

Bixinta kharashka dhexdhexaadinta (oo guud ahaan ay si siman u wadaagaan dhinacyadu) waxay dhinacyada xaq u siinaysaa laba kulan dhexdhexaadin wakhti kasta kahor xukun ama amar kama-dambeys ah. Marka ay dhinacyadu galaan laba kulan dhexdhexaadin, wixii ah dhedhexaadin dheeraad ah waxa loo rabaa bixin lacag dheeraad ah. Waxa kale oo bixinta lacagta loo rabaa dhexdhexaadinta arrimo ka dambeeya xukunka, marka laga reebo soo-jeedinta ujeedkeedu yahay *kaliya* fulinta amaro taageero ilmo.

### Dib-u-ballamin

Haddii labada dhinac mid aanuu iman karin dhexdhexaadin ballansan, waa in soo-jeedin qoran oo ah in la sii wado laga xereysto Karaaniga Maxkamadda hal todobaad gudaheed laga bilaabo taariikhda Amarka Maamulista Kiiska ama Ogeysiiska Dhexdhexaadinta.

### Nidaamka Joojinta

Haddii labada dhinacba ay ku heshiiyaan in la joojiyo kulan dhexdhexaadin oo ballansan, waa in ogeysiis la siiyo Karaaniga Maxkamadda ugu yaraan 48 saacadood kahor dhexdhexaadinta. Haddii aanad joojin kulankaaga dhexdhexaadinta, oo aanad iman, waxa lagaa rabi doonaa inad bixisid lacag dheeraad ah si dib laguugu ballamiyo dhexdhexaadinta.

### Dokumentiyada Taageerada Ilmaha

Haddii dhinacyadu aanay taas u sameyn shir maamulis kiis, kahor dhexdhexaadinta waxa dhinacyada laga rabaa inay kala beddeshaan Caddeymaha Taageero Ilmo iyo Xaashiyaha Taageero Ilmo. Waxa kale oo loo baahan karaa Caddeyn Dhaqaale. Waxa waraaqaha laga heli karaa Karaaniga Maxkamadda.